Sharciyada

Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee la Nidaamiyay

Dhaqangalaya 5/12/2021

Oregon Department of Education
Early Learning Division | Office of Child Care
www.oregonearlylearning.com
1-800-556-6616

Shaxanka Tusmada

414-180-0005 Ujeeddada....4

414-180-0010 Qeexitaanno....4

414-180-0015 Caafimaadka....6

414-180-0020 Fayodhawrka....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0025 Badbaadada....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0030 Hagitaanka iyo Anshaxa....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0035 Nafaqada....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0040 Helitaanka Waxqabad Jireed....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0045 Diiwaan Haynta....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0050 Shuruudaha Guud....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0055 Dhaqangalinta Shuruudaha Nidaaminta....**Error! Bookmark not defined.**

414-180-0090 U Hoggaansanaanta Shuruudaha Warbixinta Xadgudubka Ilmaha....**Error! Bookmark not defined.**

XARUMAHA KAALMADA DARYEELKA ILMAHA EE LA NIDAAMIYAY

414-180-0005 Ujeeddo

Sharciyada Maamulka Oregon (OAR) 414-180-0005 ilaa 414-180-0100 waa shuruudaha caafimaadka iyo badqabka ugu yar ee Qaybta Waxbarashada Hore ee loogu talogalay bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee laga dhaafay ruqsadda kuwaas oo qaata lacagaha kabka daryeelka ilmaha ee dawlada dhexe iyada oo loo sii marayo gobolka. Ujeedada sharciyadani waa in la ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, iyo fayoqabka carruurta lagu hayo daryeelka. Sharciyadani waxay khuseeyaan bixiyeyaasha daryeelka ilmaha ee qaata kabka daryeelka ilmaha dawlada dhexe ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon ama Xafiiska Qaybta Waxbarashada Hore ee Daryeelka Ilmaha oo laga dhaafo ruqsadda daryeelka ilmaha sida ku qeexan ORS 329A.250.

414-180-0010 Qeexitaanno

Qeexitaannada soo socdaa waxay dabaqayaan Sharciyada Maamulka Oregon 414-180-0015 illaa 414-180-0090.

(1) "Daryeel-bixiye" waa qof kasta, oo uu ku jiro bixiyaha, oo daryeela carruurta ku jirta daryeelka ilmaha ee Kabitaanka Nidaamsan oo si toos ah uga shaqeeya carruurta, siinta daryeel, kormeer iyo hagitaan.

(2) "Daryeelka Ilmaha" waa daryeelka, kormeerka iyo hagidda si joogto ah ubadka, oo aysan la socon waalid, mas'uul sharci ah ama koriye, inta lagu jiro qayb ka mid ah 24 saacadood ee maalinta, leh ama aan lahayn magdhow.

(3) "Daryeelka Ilmaha ee Ilmaha" waa ilmo ka yar 13 sano, ama ilmo ka yar 18 sano oo leh baahi gaar ah. Carruurta da'doodu noqoto 13 ama 18 jir ee qaba baahiyaha gaarka ah waxay ahaanayaan ilmo uqalma dayreelka ilmaha iyadoo ku salaysan da’ada ilaa wakhtiga shahaadadooda hadda. Bixiyuhu waxa uu leeyahay masuuliyadda kormeerka ilmaha marka uu waalidku si ku meel gaadh u maqan yahay.

(4) "Xarunta Daryeelka Ilmaha" waa meesha lagu sameeyo daryeelka ilmaha. Waxay noqon kartaa guri gaar loo leeyahay ama dhismo ganacsi ahaan loo qoondeeyay.

(5) "Ilmaha Baahiyaha Gaarka ah qaba" waa ilmaha da'diisu ka yar tahay 18 sano oo u baahan heer daryeel oo ka sarreeya heerka caadiga ah ee da'dooda sababtoo ah naafo jireed, korriin, dabeecad, maskax ama caafimaad.

(6) "Cudurka la Isqaadsiiyo" waa jirro uu keeno cudur dhaliye faafa ama suntiisa.

(7) “Jeermis dilid” waa adeegsiga hab lagu baabi’iyo ama si aan soo noqosho lahayn loo curyaamiyo noolaha waxyeelada leh, oo ay ka midka yihiin bakteeriyada, fayrasyada, jeermiska iyo fangaska

(8) "Qoys" waa koox dad ah oo wadaaga dhiig, guur ama korsasho, ama shakhsiyaad xiriirkooda uu la mid yahay kuwa kooxahan oo kale.

(9) "Dhallaan" waa ilmaha laga bilaabo waqtiga dhalashada ilaa 12 bilood jir.

(10) "Office of Child Care (OCC)" waa Xafiiska Daryeelka Carruurta, Qaybta Waxbarashada Hore ee Waaxda Waxbarashada.

(11) "Dillaaca Cudurrada la Isqaadsiiyo" macneheedu waa laba xaaladood oo ka yimid qoysas kala duwan oo wadaaga ilo la tuhunsan yahay.

(12) "Dhismayaal" waa qaab-dhismeedka meesha lagu sameeyo daryeelka ilmaha kaas oo lagu aqoonsaday codsiga ama ka diiwaangashan Waaxda Adeegyada Dadweynaha, oo ay ku jiraan qaybaha gudaha iyo dibadda iyo banaanka aan si toos ah loogu isticmaalin daryeelka ilmaha.

(13) "Ilmaha Da’ada Dugsiga Barbaarinta" waa ilmaha jira 36 bilood ilaa uu uqalmo inuu dhigto xadaanada carruurta ee dugsiga dadweynaha

(14) " Bixiye" waa qofka ama xarunta ka mas'uul ah carruurta lagu hayo; waa daryeelaha aasaasiga ah ee carruurta; oo uga diiwaangashan Waaxda Adeegyada Dadweynaha bixiye ahaan.

(15) "Kabka Daryeelka Ilmaha ee la Nidaamiyay" waa daryeelka la siiyo carruurta ay qoysaskooda helaan dhaqaalaha kabka daryeelka ilmaha ee dawladda dhexe ee loo sii marayo gobolka.

(16) "Cudurka la Xaddidi karo" waa jirro ama caabuq ka mamnuucaya ilmaha inuu tago daryeelka ilmaha.

(17) "Nadiifin" waa isticmaalka daawayn siisa kul ku filan ama kiimikooyin cufan waqti ku filan si loo yareeyo tirada bakteeriyada, oo ay ku jiraan noolaha keena cudurrada, ilaa la gaadho heerka badbaadada ee maacuunta, qalabka iyo alaabada lagu ciyaaro.

(18) "Dhaawac halis ah ama dhacdo" macnaheedu waa mid ka mid ah kuwan soo socda:

(a) Dhaawac u baahan qalliin;

(b) Dhaawac u baahan in isbitaal la dhigo;

(c) Dhaawac u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah;

(d) Margashada iyo dhibaatooyinka neefsashada ee lama filaanka ah;

(e) Miyir la'aan;

(f) Shoog maskaxeed;

(g) Sumow;

(h) Qaadasho daawo xad dhaaf ah;

(i) Lafo jaban;

(j) Dhaawac daran oo madaxa ama qoorta ah;

(k) Kiimiko taabatay indhaha, afka, maqaarka, la neefsaday ama la liqay;

(l) Gubashooyinka oo dhan;

(m) Fal-celin xasaasiyad oo u baahan siinta Epi-Pen;

(n) Dhiigbax daran ama tolmo;

(o) Naxdin ama xaalad wareer;

(p) Qarqoomid.

(19) “Bixiyaha Beddelka ah” waa qofka u dhaqma sidii daryeelaha aasaasiga ah ee carruurta marka uu si ku meel gaadh ah u maqan yahay bixiyaha.

(20) ”Socod-barad” waa ilmo jira ugu yaraan 12 bilood laakiin aan ahayn da'dii dugsiga barbaarinta.

(21) “Gelitaanka Aan Kormeernayn ee Carruurta” waa la xidhiidhka carruurta taas oo fursad u siinaysa qofka xidhiidh shaqsi ah ama taabasho marka aanay ku hoos jirin kormeerka tooska ah ee bixiyaha daryeelka ilmaha ama shaqaalaha leh awoodda kormeerka.

(22) "Ka-bixitaanka la Isticmaali karo" waa albaab ama daaqad aan cidhiidhi ahayn oo bixiyaha iyo carruurtu ay ka bixi karaan goobta daryeelka ilmaha haddii ay dhacdo dab ama xaalad degdeg ah. Albaabada waa in laga furi karo gudaha iyada oo aan fure lahayn.

(a) Dhismayaasha la dhisay kahor Juulay 1, 2010, daloolka daaqaduhu waa inay ahaadaan ugu yaraan 20 inji oo ballac ah iyo ugu yaraan 22 inji oo dherer ah, oo leh furitaan saafi ah oo dhan shan cagood oo laba jibaaran (ugu yaraan 720 inji oo laba jibbaaran) iyo xakabad hoose oo aan ka badnayn 48 inji oo dhulka ka koraysa.

(b) Dhismayaasha la dhisay kadib Juulay 1, 2010, daloolka daaqaduhu waa inay ahaadaan ugu yaraan 20 inji oo ballac ah iyo ugu yaraan 24 inji oo dherer ah, oo leh furitaan saafi ah oo dhan shan cagood oo laba jibbaaran (ugu yaraan 720 inji oo laba jibbaaran) iyo xakabad hoose oo aan ka badnayn 44 inji oo dhulka ka koraysa.

414-180-0015 Caafimaadka

(1) Bixiyuhu waa inuu mudnaanta koowaad siiyaa baahiyaha carruurta, isagoo hubinaya inay helaan daryeel iyo ka warqab ku filan.

(2) Xarunta daryeelka ilmaha waa inay u noqotaa deegaan caafimaad qaba carruurta.

(3) Dhammaan daryeelayaashu waa inay qaadaan taxaddar ku habboon si ay uga hortagaan cudurka ruxmanka ilmaha iyo dhaawaca madaxa ee xadgudubka ah.

(4) Waa inay jiraan ugu yaraan hal musqul oo la falasho iyo hal saxan oo gacmaha lagu dhaqo oo ay heli karaan carruurta. Biyaha la cabbo ee lagu diyaariyo cuntada, caanaha dhallaanka, cabbitaanka ama karinta waa in aan laga soo qaadin saxanka gacmaha lagu dhaqo.

(5) Xaruntu waa inay tilmaamto meesha ay yaalliin dhammaan qasabadaha biyaha laga cabbo iyo qalabka ay carruurtu heli karaan ama loo isticmaali karo in la helo biyo lagu diyaariyo cuntada, caanaha dhallaanka, cabbitaanka ama karinta waana in muunad laga qaado biyaha tuubooyinkan iyo qalabka si looga baaro leedh. Xaruntu waa inay muunada u qaadaa si waafaqsan 3T-ga Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka si ay u yarayso sunta leedh ee Biyaha la cabbo ee Dugsiyada: Hagitaan dib loo eegay oo ku taariikhaysan Oktoobar 2006 waana in la isticmaala Barnaamijka Aqoonsiga Shaybaarka Deegaanka ee Oregon (ORELAP) shaybaarka biyaha la cabbo ee la aqoonsan yahay.

(6) Baadhista leedh sida looga baahan yahay 414-180-0015(5) waa in la sameeyaa lixdii sano ee la soo dhaafay ee taariikhda dhaqangalka ee qaybtan iyo ugu dambayn lix bilood kadib taariikhda dhaqangalka ee qaybtan iyo ugu yaraan hal mar lixdii sanaba.

(7) Natiijooyinka baadhista waa in lagu hayaa dhismaha xarunta wakhti kasta, koobigana waa in lagu siiyaa Xafiiska daryeelka ilmaha toban (10) maalmood gudahooda marka natiijada la helo.

(8) Iyada oo aan loo eegin natiijooyinka baadhista, xaruntu waa in ay isla markiiba ku ogaysiisaa dhammaan waalidiinta iyo mas'uulada hadal, qoraal, ama iimayl, natiijada baadhista oo ay natiijada ku dhejiyaan meel caan ah oo xarunta ah halkaas oo ay ka arki doonaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta hal maalin shaqo gudaheed. . Macluumaadka la siiyo waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah waa in ay ahaato mid waafaqsan 3T-ga Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka si ay u yarayso sunta leedh ee ku jirta biyaha la cabbo ee dugsiyada: Hagitaan dib loo eegay oo ku taariikhaysan Oktoobar 2006.

(9) Haddii natiijadu baadhistu tahay ama ka badan tahay 15 qaybood halkii bilyan (ppb), xarunta waa inay isla markiiba:

(a) Ka ilaalisaa carruurta inay isticmaalaan ama ka cabbaan biyaha qasabadaha ama qalabka lagu caddeeyey 414-180-0015(5) kuwaas oo leh natiijooyin baadhitaan oo ah ama ka sarreeya 15 ppb, tuubooyinka keena biyaha la cabbo ama qalabka lagu aqoonsaday 414-180-0015 5) kuwaas oo leh natiijooyin baadhitaan oo ka hooseeya 15 ppb ama biyaha ku jira quraarada ama baakadaysan si ay u buuxiyaan shuruudaha qaybtan;

(b) Lixdan maalmood gudahooda marka la helo natiijada baadhitaanka, bixiyaha waa in uu soo gudbiyaa qorshe hawleed sixid ah si ay OCC u ansixiso qasabad kasta ama qalab kasta oo leh natiijooyin baadhitaan oo ah ama ka sarreeya 15 ppb, iyada oo la raacayo 3T-ga Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykankasi loo dhimo sunta leedh ee Biyaha la Cabo ee Dugsiyada: Hagitaanka dib loo eegay ee Oktoobar 2006;

(c) Xaruntu waa inay fulisaa tallaabooyinka sixitaanka ama hagaajinta ee lagu aqoonsaday qorshaha la ansixiyay 30 maalmood gudahooda ee ogolaanshaha OCC; iyo

(d) Xaruntu waa inay samaysaa muunad dabagal ah natiijooyinkuna waa inay muujiyaan sunta leedh oo ka hoosaysa 15 ppb kahor inta aanay xaruntu dib u bilaabin isticmaalka qasabadaha ama qalabyada lagu caddeeyey 414-180-0015(5) ee hore loo tijaabiyey ama ka sareeya 15 ppb.

(10) Bixiyuhu waxa uu u soo gudbin karaa natiijooyinka baadhista leedh ee diiwaansan ee la helay lix sano gudahood isla markiiba kahor taariikhda dhaqangalka ah ee qaybtan OCC. Bixintaani waxay khusaysaa oo keliya baadhitaanada la sameeyay si waafaqsan 3T-ga Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka si loo yareeyo Leedhka ku jira biyaha la cabbo ee dugsiyada: Hagitaan dib loo eegay oo ku taariikhaysan Oktoobar 2006 natiijaduna waxay ka hoosaysay 15 ppb. OCC ayaa go'aamin doonta in baadhitaanada la gudbiyay ay waafaqsan yihiin shuruudaha OAR 414-180-0015(5).

(11) Iyadoo aan loo eegin natiijooyinka loo helay si waafaqsan 414-180-0015(5), tallaabooyinka looga hortagayo soo gaadhitaanka carruurta ee wasakhowga leedh ee biyaha la cabbo waxaa ka mid ah:

(a) Tuubbooyinka oo la nadiifiyo kahor inta aan loo isticmaalin diyaarinta cuntada, caanaha dhallaanka, cabbidda ama karinta adigoo furaya tuubada mar kasta kahor inta aan la isticmaalin ilaa ay biyuhu noqonayaan diirimaad (30 ilbiriqsi ilaa laba daqiiqo); iyo

(b) U isticmaalka biyaha qabow ee qasabadaha biyaha la cabbo ama qalabka lagu caddeeyey 414-180-0015(5) kuwaas oo leh natiijooyin baadhitaan oo ka hooseeya 15 ppb kaliya diyaarinta cunto, caanaha dhallaanka, cabbitaanka ama karinta.

(c) Karkarinta biyuhu kama saaraan birta leedh biyaha loomana arko tallaabo la aqbali karo si carruurta looga ilaaliyo wasakhowga leedh ee biyaha la cabbo.

(12) Barnaamijyada socdaa waa inay soo gudbiyaan natiijooyinka baadhitaanka Sebtembar 30, 2018.

(13) Haddii bixiye beddelo tuubooyinka ama qalabyada la aqoonsaday si waafaqsan OAR 414-180-0015(5) wakhti kasta, bixiyaha waa in uu ogeysiiyaa OCC oo muunad ka qaadaa biyaha tuubooyinkan iyo qalabkan si waafaqsan shuruudaha OAR 414-180-0015(5) oo waa

inuu ku siiyaa natiijooyinka baadhitaanka OCC toban (10) maalmood gudahooda marka la helo natiijooyinka. Bixiyahu uma oggolaan karo isticmaalka qasabada ama qalabka la beddelay ilaa OCC ay oggolaato isticmaalka.

(14) Bixiyuhu waa inuu u hoggaansamo sharciyada maxalliga ah, kuwa gobolka iyo federaalka ee la xiriira tallaallada, cudurrada la xaddidi karo ee daryeelka ilmaha, nidaamka badbaadada carruurta iyo suumanka kursiga ee baabuurta, badbaadada baaskiillka, sharciyada xuquuqda madaniga ah, iyo Sharciga Naafada Maraykanka.

(15) Waa in la raacaa hab-dhaqannada hurdada nabdoon ee soo socda:

(a) Ilmo kastaa waa in uu ku seexdaa sariir, sariir la qaadi karo, baasinet ama xool yar oo leh furaash nadiif ah oo aan nuugayn. Dhammaan sariiraha, sariiraha la qaadi karo, baasinetka iyo xoolalka waa inay u hoggaansamaan heerarka Guddiga Badbaadada Waxsoosaarka Macmiilka ee hadda jira;

(b) Xoolalka carruurta waxa keliya la isticmaali karaa ilaa inta ilmuhu uu awoodo inuu iskii isku rogo;

(c) Joodari kastaa waa inuu:

(A) Si fiican ugu habboon yahay; oo

(B) Lagu daboolo go' si adag ugu habboon.

(d) Ilmo kasta waa in la siiyaa go’ nadiif ah;

(e) Dhallaanka waa in dhabarka loo jiifiyaa meel fidsan si ay u seexdaan;

(f) Inta uu ilmuhu ku jiro goobaha daryeelka ilmaha, haddii dhallaanku ku seexdo meel kale oo aan ahayn sariirtooda, sariirta la qaadi karo, baasinetka ama xoolka, bixiyaha waa inuu isla markiiba u qaadaa ilmaha meel hurdo oo habboon;

(g) Ilmona caadiyan si joogto ah loogama tagi karo sariirta, sariirta la qaadi karo, baasinetka ama xoolka marka laga reebo xiliga hurdada ama nasashada;

(h) Waa in uusan ilmaha ku haysan ashyaa sariirta, sariirta la qaadi karo, baasinetka ama xoolka, marka laga reebo mujuruca (tusaale, dhalooyinka, alaabta ay ku ciyaaraan, barkimada, boombalada, bustayaal, boomaato);

(i) Duubitaanka ama dharka kale ama huga xaddidaya dhaqdhaqaaqa ilmaha waa mamnuuc;

(j) Duubitaanka ama dharka iyo shay’ada keeni kara khatar ceejin (tusaale, silsiladaha ilkaha leh, ku xidhmada mujuruca, xargaha dharka) waa mamnuuc; iyo

(k) kuraasta baabuurka waa in loo isticmaalo gaadiid ahaan oo kaliya. Carruurta ku dhex seexata kursiga baabuurka waa in laga saaraa marka ay yimaadaan xarunta daryeelka oo la geliyo meel hurdo oo habboon.

(16) Haddii waalidku codsado, walaalaha waxay wadaagi karaan sariir isku mid ah.

(17) Qaybta sare ee sariiraha waa in aan loo isticmaalin carruurta ka yar toban sano.

(18) Carruurta aan is quudin karin waa in la taageero ama, haddii ay karaan keligood fadhiistan, lagu quudiyo qaab fadhi qumman.

(a) Dhallaanka da'doodu tahay 6 bilood waa in lagu qabtaa ama la fadhiisiyaa dhabta daryeelaha si loo siiyo musaasada;

(b) Musaasadaha waa inaan barkinta la dul saarin. Waa inuu qabtaa musaasada ilmaha ama daryeelaha; iyo

(c) dhallaanka aan hadda lagu hayn quudinta waa in lagu quudiyaa hab badbaado iyo raaxaysi leh.

(19) Carruurta da' walba leh waa inaan lagu jiifin musaasad.

(20) Agabyada gargaarka degdegga ah iyo jaantuska ama buug-gacmeedka tilmaamaha gargaarka degdegga ah waa in lagu hayaa meel la aqoonsan yahay oo lagana ilaaliyo inay carruurtu gaadhaan.

(21) Agabyada gargaarka degdegga ah waa in ay ku jiraan: baandhays, sharooto xabag ah, suufka faashad nadiif ah, saabuun ama shukumaanada jeermiska dila ee xidhan ama dareeraha loo isticmaalo boogo nadiifinta, dareeraha jeermiska dila ee dhiig daadashada kadib, aaladda cabirka qandhada oo nadiif ah.

(22) Jirro:

(a) Marka laga reebo calaamadaha hargabka fudud ee aan wax u dhimayn shaqada maalinlaha ah ee ilmaha, carruurta buka waa in aan lagu hayn daryeel bixinta.

(b) Bixiye waa inuusan gelin ama ku hayn daryeel bixinta, marka laga reebo isagoo haysta oggolaanshaha qoran ee xafiiska caafimaadka deegaanka, ilmo:

(A) Laga helay inuu qabo ama uu qaaday cudurka la xadidi karo ee daryeelka ilmaha, sida lagu qeexay sharciga Maamulka Caafimaadka Oregon; ama

(B) Uu leeyahay mid ka mid ah calaamadaha soo socda ama isku-darka calaamadaha ama jirrada;

(i) Qandho ka badan 100°F, oo gacanta hoosteeda laga qaado;

(ii) Shuban (in ka badan hal saxaro oo jilcan, dareere ah, biyo ah ama saxaro dhiig leh);

(iii) Matagid;

(iv) Lalabbo;

(v) Qufac daran;

(vi) Midab huruud ah oo aan caadi ahayn oo maqaarka ama indhaha ah;

(vii) Nabarro maqaarka ama isha ah ama finan daran, xoqmay, ama malax leh;

(viii) Luqun adag iyo madax xanuun oo leh hal ama in ka badan oo ah calaamadaha kor ku xusan;

(ix) Neefsashada oo ku adkaata ama hiinraag aan caadi ahayn; ama

(x) Cabasho xanuun daran.

(c) Ilmaha, kadib marka la seexiyo daryeelka ilmaha, ay ka muuqdaan calaamado jirro, sida lagu qeexay sharcigan, mar kasta oo ay suurtogal tahay waa laga saarayaa carruurta kale, waalidkana waxa lagu wargelinayaa inay ka saaraan ilmaha xarunta daryeelka sida ugu dhaqsaha badan.

(d) Haddii ilmuhu leeyahay calaamado hargab oo fudud oo aan wax u dhimayn shaqadiisa caadiga ah, ilmuhu waxa uu ku sii jiri karaa goobta lagu hayo ilmaha oo waalidka(iinta) waxa la wargelinayaa goortay qaadayaan ilmahooda.

(23) Qaybta 22aad ee sharcigani ma khusayso marka bixiyaha uu daryeelayo kaliya carruur isku qoys ah oo aysan jirin caruur kale oo ku jirta daryeelka ilmaha, marka laga reebo in bixiyaha uu ogeysiin doono waalidka haddii ilmaha, kadib marka la geliyo daryeelka ilmaha, uu muujiyo calaamado jirro.

(24) Waalidiinta waa in la ogeysiiyaa haddii ilmahooda uu gaadho dillaaca cudur la kala qaado.

(25) Haddii ilmo qaba xasaasiyad la diiwaan geliyo oo u baahan qorshe gaar ah oo lagu daryeelayo ilmahaa, qorshahan oo kale waa in lagu sameeyaa qoraal u dhexeeya bixiyaha iyo waalidka, iyo, haddii loo baahdo, khabiiro dibadda ah. Dhammaan daryeelayaasha la xidhiidhaya ilmahaas waa inay si buuxda ula socdaan qorshaha.

(26) Qofna waa inuusan sigaar cabbin ama qaadanin wax kasta oo qalab sigaar ah, oo ay ku jiraan sigaarka elektaroonigga ah ama uumiga ah xarunta daryeelka ilmaha dhexdeeda ama meel u jirta toban fiit meel kasta oo laga soo galo, laga baxo, ama daaqado kasta oo furma ama meel kasta oo hawo laga helo oo u adeegta meel xiran, inta lagu jiro saacadaha daryeelka ilmaha ama marka ay carruurta joogaan daryeelka ilmaha.

(27) Qofna waa inuusan ku isticmaalin tubaakada aan qiiqa lahayn goobta lagu hayo carruurta inta lagu jiro saacadaha daryeelka ilmaha ama marka ay joogaan carruurtu daryeelka ilmaha.

(28) Qofna waa inuusan ku dhex cabbin sigaar, qaadan wax sigaar ah oo shidan, oo ay ku jiraan sigaarka elektaroonigga ah, ama uumiga ah ama ku dhex isticmaalin tubaakada aan qiiqa lahayn baabuurta marka carruurta daryeelka ilmaha ay rakaab yihiin.

(29) Qofna waa inuusan khamriga ku cabbin goobta lagu hayo carruurta inta lagu jiro saacadaha daryeelka ilmaha ama marka carruurtu ay joogaan daryeelka ilmaha.

(30) Qofna waa inuusan ku sikhraamin dhismayaasha xarunta daryeelka ilmaha inta lagu jiro saacadaha daryeelka ilmaha ama marka carruurtu ay joogaan daryeelka ilmaha.

(31) Qofna waa inuusan haysan, isticmaalin ama ku kaydin walxaha sharci darrada ah ee laga ilaaliyo dhismaha xarunta daryeelka ilmaha. Qofna waa inuusan ku maandoorsamin walxaha sharci darrada ah ee laga ilaaliyo dhismaha xarunta daryeelka ilmaha.

(32) Qofna waa inuusan ku beerin ama ku qaybin marijuana dhismaha xarunta daryeelka ilmaha. Qof weyni waa inuusan ku isticmaalin marijuana dhismaha goobta daryeelka ilmaha inta lagu jiro saacadaha daryeelka ilmaha ama marka carruurtu ay joogaan daryeelka ilmaha.

(33) Bixiyayaasha daryeelka ilmaha iyo shakhsi kasta oo kormeeraya, gaadiid ku qaadaya, diyaarinaya cunto, ama sida kale ka shaqeeya agagaarka carruurta daryeelka ilmaha iyo kuwa buuxinaya xaadiritaanka maalinlaha ah iyo diiwaannada biilasha waa in aysan ku jirin xaalad sakhraamid.

(34) "Xaalad sakhraamid" macnaheedu waa hab-dhaqan aan caadi ahayn oo la arkay ama daciifnimo xagga maskaxda ama waxqabadka jidhka ah taasoo macquul ka dhigaysa inuu qofku isticmaalay aalkolo, walxo kasta oo la kantaroolo (ay ku jiraan daawooyinka si sharci ah loo qoray iyo kuwa dhakhtar la'aan la qaadan karo), marijuana (ay ku jirto marijuanada caafimaadka), kuwa la neefsado ee daciifiya waxqabadkooda shaqooyinka muhiimka ah ama abuura dhibaatayn toos ah carruurta ku jirta daryeelka ilmaha ama dadka kale. Tusaalooyinka dhaqamada aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn dhalanteed, shakisnaan, ama xadgudubyo cadho leh. Tusaalooyinka daciifnimada xagga waxqabadka jirka ama maskaxda. Waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn hadalka baahsan iyo sidoo kale socodka ama qabashada hawlaha oo adag.

(35) Dhammaan marijuana oo dhan, waxyaabaha laga keeno marijuana iyo agabyada la xidhiidha waa in lagu kaydiyaa qufulka badbaadada carruurta.

(36) Xayawaan kasta oo jooga xarunta daryeelka ilmaha waa inuu caafimaad qabaa oo uu saaxiib la noqdaa carruurta ku jirta daryeelka.

(37) Eyda iyo bisadaha waa in la tallaalaa sida uu qabo talooyinka dhakhtar xayawaanka ee ruqsadda leh.

(38) Eyda iyo bisadaha waa in laga ilaaliyaa boodada, shilinta iyo gooryaanka.

(39) Sanduuqyada qashinka xoolaha waa in aan la dhigin meelaha ay carruurtu heli karaan ama meelaha loo isticmaalo kaydinta ama diyaarinta cuntada.

(40) Xayawaanka duurjoogta ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: xamaaratada (sida qorratada, diinka, masaska) amfibiyaanka, daayeerrada, shimbiraha hilib cunka ah, digaagga dhallaanka ah iyo xoorka waa mamnuuc haddii aysan ku jirin haan ama weel kale oo u diidaya taabashada tooska ah ee carruurta. Barnaamijyada waxbarashada ee ay ku jiraan xayawaannada la mamnuucay oo ay maamulaan beerta xayawaanka, matxafyada iyo xirfadlayaasha kale ee xayawaanka waa la oggol yahay.

(41) Daawaynta dhakhtarku qoray iyo kuwa aanu dhakhtar qorin waa in la siiyaa oo keliya ilmaha haddii bixiyaha uu oggolaansho qoraal ah ka haysto waalidka.

(42) Daawooyinka dhakhtarku qoray iyo kuwa aanu dhakhtar qorin waa in si sax ah loo calaamadiyaa oo loo kaydiyaa.

(43) Daawooyinka aanu dhakhtar qorin ama walxaha maqaarka la mariyo waa in lagu calaamadiyaa magaca ilmaha.

(44) Daawooyinka dhakhtarku qoray waa inay ku jiraan weelka asalka ah oo lagu calaamadiyaa magaca ilmaha, magaca daawada, qiyaasta, tilmaamaha loo siinayo, iyo magaca dhakhtarka.

(45) Daawooyinka u baahan qaboojiyaha waa in lagu hayaa weel gooni ah oo si adag u daboolan, oo lagu calaamadeeya "daawo", talaajadda dhexdeeda.

(46) Waalidiinta waa in lagu wargeliyaa maalin kasta dawo kasta oo la siiyo ilmahooda ama dhaawac kasta oo ilmahooda soo gaadhay.

(47) Kareemka qorraxda waxaa lagu isticmaali karaa oggolaansho waalid oo qoran.

(a) Xaaladaha ay waalidku ku bixiyeen oggolaansho qoraal ah in la isticmaalo kareemka qorraxda, bixiyayaasha waa inay dib u mariyaan kareemka qorraxda labadii saacadoodba mar inta carruurta ku jirta daryeelka ilmaha ay soo gaadhayso qorraxdu.

(b) Bixiyeyaasha waa inay isticmaalaan kareemka qorraxda leh oo leh SPF 15 ama ka badan waana in lagu calaamadiyaa "Broad Spectrum".

(c) Bixiyeyaasha waa in aysan u isticmaalin kareemada qorraxda ee eerosalka ah carruurta ku jirta daryeelka ilmaha.

(d) Kareemka qorraxda waa inaan loo isticmaalin carruurta ku jirta daryeelka ilmaha ee ka yar lix bilood.

(48) Waalidiinta waa in la siiyaa lambarka taleefanka si ay ula xiriiraan bixiyaha haddii loo baahdo.

414-180-0020 Fayadhowrka

(1) Nadiifiyayaal hore la isugu qasay iyo jeermis-dileyaal ka diiwaangashan EPA oo buuxiya shuruudaha Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa loo isticmaali karaa dhammaan aagagga xarunta daryeelka ilmaha iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha.

(2) Dhammaan daryeelayaasha iyo carruurtu waa inay ku dhaqaan gacmahooda saabuun iyo biyo diirran oo socda:

(a) Kahor intaanay cuntada qaban;

(b) Kahor intaanay ka caawin quudinta;

(c) Kahor iyo kadib wax cunista;

(d) Xafaayadda kadib;

(e) Kadib isticmaalka musqusha;

(f) Kadib markaad qof ka caawiso musqulaha;

(g) Kadib markaad sanka tirtirto;

(h) Kadib markii uu ku ciyaaray dibadda; iyo

(i) Kadib markaad taabato xayawaanka ama qabato alaabta lagu ciyaaro ee xayawaanka rabaayada ah.

(3) Nadiifiyeyaasha gacmahu waa inaysan beddelin gacmo-dhaqashada. Haddii gacmo-nadiifiyeyaal ay yaalaan goobta daryeelka carruurta, waa in laga ilaaliyaa inay carruurtu gaadhaan waana inaan loo isticmaalin carruurta.

(4) Nadiifi alaabta carruurtu ku ciyaarto, qalabka iyo alaabta guriga ee ay isticmaalaan carruurtu marka ay wasakhoobaan.

(5) Dusha sare ee beddelka xafaayadda waa inay ahaadaan midkood:

(a) Mid aan nuugin oo si fudud loo jeermis dilo;

(b) La tuuro isticmaal kasta kadib; ama

(c) La dhaqo kadib isticmaal kasta.

(6) Dhismaha, garoonada, alaabada ay ku ciyaaraan, qalabka, iyo alaabta guriga waxa lagu ilaalinayaa xaalad nadiif ah, nadaafad leh, oo ka madhan xaalad khatar ah.

(7) Dhammaan qashinka oo dhan, qashinka adag, iyo qashinka la diiday waa in loo qubo si joogto ah, ammaan ah oo nadiif ah.

(8) Wasakhowga-noolaha oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn dareeraha jidhka iyo dhiigga waa in loo daadiyaa hab kahortagaya soo-gaadhista carruurta.

(9) Xarunta daryeelka caruurtu waxay leedahay biyo nadiif ah oo la cabbo.

414-180-0025 Badbaadada

(1) Heerkulka qolku waa inuu ahaadaa ugu yaraan 68°F inta lagu jiro saacadaha ay carruurta ku jiraan daryeelka ilmaha.

(2) Qolalka carruurta lagu hayo inta badan waa inay lahaadaan iftiin dabiici ah iyo kuwo macmal ah oo isku jira.

(3) Sagxada dhulka waa inaysan lahayn jeex-jeexyo, dildilaacyo waaweyn oo aan la xidhin, roogag simbiriirixan iyo khataro kale.

(4) Xayawaanka suurtogal ahaan cadhaysan waa inaysan meel ku wada jirin carruurta.

(5) Carruurta waa in laga ilaaliyaa khataraha dabka iyo badbaadada. Bixiyeyaasha waa inay ku lahaadaan ilaalinta soo socota goobta:

(a) Dhammaan meelaha korontada ka baxdo ee qolalka ay isticmaalaan dugsiga barbaarinta ama carruurta ka yar waa inay lahaadan koofiyadaha ilaalinta ama qalabka badbaadada ee ay adag tahay in la saaro marka duleelka aan la isticmaalayn.

(b) Xadhkaha fidinta waa inaan loo isticmaalin silig joogto ah;

(c) Dhammaan xadhkaha qalabku waa inay ahaadaan kuwo wanaagsan;

(d) Xidhiidhiyayaasha badan ee xadhkaha waa in aan la isticmaalin;

(e) Xarigga korantada ee dhulka ku jira oo leh ilaalin dheeraad ah oo hadda ah ayaa la isticmaali karaa;

(f) Darbi xasiloon waa in lagu rakibaa si looga hortago in carruurta ay ku dhacaan khataraha, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: meelaha dabka lagu shido, kuleyliyaha iyo moofada alwaaxda ah ee la isticmaalo marka carruurta ay joogaan daryeelka ilmaha;

(g) Darbi sugan waa in la dhigaa xagga sare iyo/ama hoose ee dhammaan jaranjarooyinka ay mari karaan dhallaanka iyo socod baradka;

(6) Xarunta daryeelka caruurtu waxay leedahay qiiq-sheege shaqaynaya heer kasta oo dabaq ah iyo meel kasta oo ilmuhu ku seexdo.

(7) Alaabada nadiifinta, rinjiyada, taraqyada, laydhka, iyo bac kasta oo waaweyn oo ku filan in ay ku xidhmaan madaxa ilmaha waa in lagu hayo qufulka badbaadada ilmaha.

(8) Waxyaabaha kale ee khatarta ah, sida dawooyinka, daroogooyinka, mindiyo fiiqan iyo walxaha sunta iyo sumowga ah waa in lagu hayo qufulka badbaadada ilmaha.

(9) Hubka, qoryaha BB-ga, qoryaha fudfudud iyo rasaasta waa in lagu hayaa meel quful leh, iyada oo rasaasta loo kaydiyay oo loo xiray si gooni ah. Hubka, qoryaha BB iyo qoryaha baasuukaha waa inay qarsoonaadan;

(10) Haddii da'da dugsiga barbaarinta ama carruurta ka yar ay ku jiraan daryeelka, dhirta sunta ah waa in laga ilaaliyaa meel aan carruurtu gaarin;

(11) Dhammaan muraayadaha cad ee albaabada waa in lagu calaamadiyaa heerka ilmaha.

(12) Bixiye kastaa waa inuu xaqiijiyaa in goobta daryeelka ilmaha ee lagu bixiyo daryeelka ay buuxiso dhammaan heerarka soo socda:

(a) Heer kasta oo dabaq ah oo ilmuhu isticmaalo wuxuu leeyahay laba bixid oo bannaanka laga baxo (albaab ama daaqad silmi leh oo loo isticmaali karo in ilmaha laga saaro ayaa la tixgelinayaa inay tahay ka bixitaan faa’iido leh). Haddii dabaqa labaad loo isticmaalo daryeelka ilmaha, bixiyaha waa inuu lahaadaa qorshe qoran oo lagu daadgureynayo dadka degan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

(b) Xarunta daryeelka carruurtu waxay leedahay taleefoon ama adeeg taleefoon oo shaqaynaya.

(c) Lambarrada taleefoonada degdegga ah ee dab-damiska, ambalaasyada, booliiska iyo xakamaynta sunta iyo ciwaanka xarunta daryeelka ilmaha waa in lagu dhejiyaa meel muuqata.

(d) Dhismaha, dhulka, biyaha, iyo alaabta carruurtu ku ciyaarto, qalabka iyo alaabta guriga ee carruurtu isticmaalaan waa in lagu ilaaliyaa xaalad aan khatar ahayn.

(e) Alaabta carruurtu ku ciyaarto, alaabta guriga iyo qalabka jaban waa in laga saaraa meelaha ay carruurtu geli karaan.

(13) Barkadaha lagu dabaasho waa ka mamnuuc in lagu dabaasho.

(14) Bixiyaha ayaa mas'uul ka ah carruurta daryeelka lagu hayo. Mar walba bixiyaha waa inuu:

(a) Ahaado mid isha ku haya ama maqlaya carruurta oo dhan;

(b) Ku feejignaada waxa uu ilmo kasta samaynayo;

(c) U dhawaada in ku filan carruurta si uu ugu jawaabo marka loo baahdo.

(15) Xarunta daryeelka ilmaha ee ku salaysan xarunta waa in aanay dhaafin saamiga iyo tirada kooxda ee Shaxda A.

Shaxanka A

Da'ada Carruurta	Tirada ugu yar ee Daryeelayaasha Carruurta	Tirada ugu badan ee Carruurta ku Jirta Koox
Dhalasho ilaa 23 Bilood	1:4	8
Da'ada 24 Bilood ilaa 35 Bilood	1:5	10
Da'da 36 Bilood ilaa Dhigashada Xadaanada	1:10	20
Dhigashada Xadaanada iyo ka weyn	1:15	30

(16) Da'ada isku qasan ee kooxda carruurta, tirada daryeelayaasha iyo tirada kooxda waa inay go'aamiyaan da'ada ilmaha ugu yar ee ku jira kooxda.

(17) 414-180-0025(15) iyo 414-180-0025(16) waxay khuseeyaan xarun-ku-salaysan daryeelka ilmaha oo lagu qeexay xarunta daryeelka ilmaha oo ku taal dhismo loo dhisay si aan ahayn guri qoys keliya.

(18) Bixiyuhu waa inuu lahaadaa qorshe qoran oo loogu daadgureynayo iyo u kaxaynta carruurta meel nabdoon haddii ay xaalad degdeg ah jirto. Qorshaha waa in lagu dhejiyaa goobta lagu hayo carruurta, oo ay yaqaanaan carruurta iyo daryeelayaasha, waana in lagu dhaqmaa ugu yaraan bil kasta oo kale waana in lagu daraa:

(a) Habraacyada ogeysiinta waalidiinta ama dadka waaweyn ee kale ee mas'uulka ka ah carruurta, guuritaanka iyo sida carruurtu ay dib ugula midoobi karaan qoysaskoodii;

(b) Habraacyada wax looga qabanayo baahiyaha carruurta gaarka ah, oo ay ku jiraan dhallaanka iyo socod-baradka, carruurta baahiyaha gaarka ah qaba iyo carruurta leh xaalado caafimaad oo daba-dheeraaday;

(c) Hab la aqbali karo oo lagu hubiyo in dhammaan carruurta xaadirka ah lagu xisaabtamo;

(d) Habraacyada lagu maareeyo masiibooyinka dabiiciga ah (sida dabka, dhulgariir, iwm.) iyo dhacdooyinka ay dadku sababeen, sida rabshadaha ka dhaca xarunta daryeelka ilmaha;

(e) Habraacyada ay dhacdo in carruurtu ay tahay inay hoy ka dhigtaan ama haddii xarunta daryeelka ilmaha ay tahay in la xiro- si aan qofna u soo gelin ama uga bixin; iyo

(19) Habraacyada lagu ilaaliyo sii wadida hawlaha daryeelka ilmaha.

(20) Haddii daryeel bixiye caruur qaadayo, daryeel bixiyaha waa inuu haystaa ruqsadda darawalnimada oo sax ah iyo caddaynta caymiska ee ku habboon.

(21) Tirada carruurta la qaaday waa in aanay ka badnaan tirada suumanka gaariga ama hababka badbaadada ilmaha ee gaadhiga laga heli karo.

(22) Bixiyuhu waa inuu sameeyaa taxaddar si uu carruurta uga ilaaliyo socodka baabuurta. Bixiyuhu waa inuu:

(a) U baahan yahay inuu dhigo oo ka soo qaado oo keliya cirifka meel ka baxsan waddada oo ka leexsan taraafikada.

(b) Hubiyaa in qof kasta oo weyn oo kormeera dhigista iyo qaadista inuu arki karo oo xaqiijiya in carruurtu ay ka fog yihiin wareegga dhammaan baabuurta kahor inta uusan baabuurna dhaqaaqin.

(23) Baabuurtan soo socota ayaa loo isticmaali karaa in lagu qaado carruurta daryeelka ilmaha:

(a) Baabuur loo sameeyay inuu qaado wax ka yar toban rakaab ah;

(b) Bas dugsi ama baska waxqabadyada badan ee dugsiga;

(c) Gaadhi loo sameeyay inuu qaado toban ama in ka badan oo rakaab ah oo la soo saaray 2010 ama kadib; ama

(d) Baabuur la soo saaray si uu u qaado toban ama in ka badan oo rakaab ah oo la soo saaray ka hor 2010, oo leh shuruudaha soo socda:

(A) Xawaaraha socdaalku kama badnaan karo 50 mph; iyo

(B) Gaadhigu waa inuu lahaadaa kormeer badbaado oo sannadle ah oo uu sameeyo garaash, ganacsade ama dukaanka dayactirka baabuurta. Caddaynta kormeerku waa inay ku jirtaa foomka ay bixiso Qaybta Waxbarashada Hore ama foom uu bixiyo kormeeruhu kaas oo ka kooban isla macluumaadka.

(24) Bixiyuhu waa inuu ka haystaa bayaan qoraal ah waalidka(iinta) oo ku saabsan haddii bixiyaha loo oggolaaday iyo in kale:

(a) Inuu ilmaha u qaado safar bannaanka ah ama waxqabadyo kale oo ka baxsan xarunta daryeelka ilmaha ama ka qaybgalka waxqabad kasta oo biyo ah; iyo

(b) U soo kaxaynta ilmaha dugsiga ama u oggolaanshaha inuu ilmaha baska la raaco ama ula lugeeyo dugsiga xarunta daryeelka ilmaha.

414-180-0030 Hagitaanka iyo Anshax-marinta

(1) Dhaqannada soo socda ee daryeelayaashu waa mamnuuc:

(a) Isticmaalka nooc kasta oo ciqaab jidheed ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: garaacid, dabo-dharbaaxid, dhirbaaxid, ruxid, qanjaruufo ama tallaabooyinka kale oo keena xanuunka jirka, ama ugu hanjabaada isticmaalka nooc kasta oo ciqaab jidheed ah.

(b) Ka codsiga waalidka ama oggolaanshaha isticmaalka nooc kasta oo ah dhaqanka ku qoran farqada (a) ee qaybtan, ma siinayso bixiyaha ama bixiyaha beddelka ah ogolaanshaha inuu sidaas sameeyo.

414-180-0035 Nafaqada

(1) Raashinka iyo cuntooyinka fudud waa inay ku saleysnaadaan tilmaamaha USDA Child iyo Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka Ilmaha.

(2) Cuntooyinka waa in lagu kaydiyaa oo lagu hayaa heerkul habboon.

(3) Dhallaanka waa in la qabtaa ama loo fadhiisiyaa si qumman xilliga quudinta musaasada. Musaasadaha keligood lagaga tego ilmaha waa mamnuuc.

414-180-0040 Helitaanka Waxqabad Jireed

(1) Bixiyeyaasha waa inay sameeyaan waxqabadyo, agab iyo qalab loogu talagalay ciyaarta gudaha iyo dibaddaba kuwaas oo bixiya waayo-aragnimo kala duwan oo ku wajahan da'da iyo kartida ilmaha (carruurta) oo leh dheelitirnaan firfircoon oo xasilloon.

(2) Carruurta ku jirta daryeelka ilmaha waa in aanay gaadhin wax ka badan laba saacadood oo wakhtiga shaashadda ah maalintii. Dhammaan soo-gaadhista warbaahintu waa inay noqotaa mid ku habboon korriinka iyo da'da. Waqtiga shaashada waxaa lagu qeexaa sida wakhtiga lagu qaato isticmaalka aaladaha sida kombuyuutar, telefishin, ama geemamka.

414-180-0045 Diiwaan Haynta

(1) Diiwaannadan soo socda, marka laga reebo kuwa lagu sheegay OAR 414-180-0045(1)(e), waa inuu hayaa bixiyaha ugu yaraan hal sano. Diiwaanadani waa inay diyaar u ahaadaan wakhti kasta OCC:

(a) Macluumaadka waalidka(iinta) ee ilma kasta wakhtiga gelitaanka:

(A) Magaca iyo taariikhda dhalashada ilmaha;

(B) Dhibaato kasta oo caafimaad oo joogto ah, oo ay ku jirto xasaasiyad, oo ilmuhu leeyahay;

(C) Taariikhda ilmuhu galay daryeelka;

(D) Magacyada, shaqada iyo lambarrada telefoonka guriga iyo ciwaanada, iyo saacadaha shaqada ee waalidka(iinta) ama masuulka sharciga ah;

(E) Magaca iyo lambarka taleefanka ee qofka(dadka) lala xiriirinayo xaaladda degdegga ah;

(F) Magaca iyo lambarka taleefanka ee qofka(dadka) ee ilmaha loo sii deyn karo;

(G) Taariikhda caafimaad ee dhibaato kasta oo saamayn karta ka qaybgalka ilmaha ee daryeelka ilmaha.

(b) Diiwaanada imaanshaha maalinlaha ah, oo ay ku jiraan taariikhaha ilma kasta ka soo qaybgalay iyo wakhtiyada imaatinka iyo bixida ee maalin kasta. Waqtiyada waa in la diwaangeliyaa marka ay carruurta daryeelka ilmaha ay yimaadaan ama ay baxayaan.

(c) Daawooyinka la bixiyo, oo ay ku jiraan magaca ilmaha, iyo taariikhda iyo wakhtiga qiyaasta iyo xaddiga qiyaasta.

(d) Dhaawaca soo gaadha ilmaha.

(e) Natiijooyinka baaritaanka leedh ee biyaha la cabbo 6-dii sano ee la soo dhaafay.

(2) Bixiyuhu waa inuu ka haystaa bayaan qoraal ah waalidka(iinta) oo ku saabsan in bixiyaha loo oggolaaday inuu helo daawaynta degdegga ah ee ilmaha iyo in kale.

414-180-0050 Shuruudaha Guud

(1) Diiwaannada OCC waxay u furan yihiin dadweynaha haddii la codsado. Si kastaba ha ahaatee, macluumaadka uu ilaaliyo sharciga gobolka ama federaalka lama shaacin doono.

(2) Magaca iyo heerka adeeg bixiyayaashu waa macluumaadka guud.

(3) Bixiyuhu waa inuu ku soo wargeliyaa OCC:

(a) Dhimasho kasta ee ilmaha inta lagu jiro daryeelka, 24 saacadood gudahood;

(b) 24 saacadood gudahood:

(A) Ilmo kasta oo ka lumay ama ka maqan dhismaha;

(B) Ilmo kasta oo looga tago dalxiiska-gaaban ee xarunta;

(C) Ilmo kasta oo looga tago dhismayaasha si aan ula kac ahayn;

(D) Ilmo kasta oo looga tego keligiis garoonka ciyaarta; ama

(E) Ilmo kasta oo looga tago keligiis baabuurka.

(c) Dhaawac ama dhacdo kasta oo halis ah, sida lagu qeexay OAR 414-180-0010(21) 5 maalmood gudahooda kadib dhacdada. Tan kuma jiraan:

(A) Dhaawacyada ilmaha ee uu si taxaddar leh u qiimeeyo xirfadle;

(B) Dhaawacyada gargaarka degdegga ah lagu bixiyay, laakiin aysan jirin daaweyn dheeraad ah oo loo baahan yahay inuu sameeyo xirfadle caafimaad: ama

(C) Dhacdooyinka caafimaad ee joogtada ah, arrimo caafimaad oo socda, sida neefta ama qallalka.

(d) Xayawaan kasta oo qaniina ilmaha 48 saacadood gudahooda kadib markay dhacdo.

414-180-0055 Dhaqangelinta Shuruudaha Nidaaminta

(1) Bixiyuhu waa inuu oggolaadaa kormeerka dhammaan qaybaha xarunta daryeelka ilmaha ee ay geli karaan carruurta daryeelka ilmaha, iyo dibu-eegis caafimaad iyo badbaado ee meelaha kale ee xarunta daryeelka ilmaha si loo hubiyo caafimaadka iyo badbaadada carruurta daryeelka ilmaha.

(2) Bixiyaha ama bixiyaha beddelka ah waa inuu u oggolaadaa wakiil ka socda Xafiiska Daryeelka Ilmaha inuu galo xarunta daryeelka ilmaha mar kasta oo ay carruur joogaan daryeelka.

(3) Bixiyuhu waa inuu u oggolaadaa waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah ee carruurta ku jirta daryeelka ilmaha inay galaan xarunta daryeelka ilmaha inta lagu jiro saacadaha carruurtoodu ay ku jiraan daryeelka.

414-180-0090 U Hogaansanaanta Shuruudaha Warbixinta Xadgudubka Ilmaha

Daryeel bixiye kasta oo haysta sabab uu ku rumaysto in ilmo uu soo gaaray ama uu hadda la ildaran yahay xadgudub (dhaawac jireed, dhaawac maskaxeed, dayacaad u horseedda dhaawac jireed, xadgudub galmo iyo/ama ka faa’idaysi, ama hanjabaad waxyeello) waa in ay u sheegaan macluumaadka Waaxda Adeegga Aadanaha ee Daryeelka Carruurta (DHS) ama hay'ad sharci fulinta. Sharci ahaan, shuruudani waxay khusaysaa 24 saacadood maalintii.